## مفهوم عهد الأمان في العصر الحاضر
## Waxa laga wado heshiiska amaanka casirga xaadirka ah

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

**(وَأَوْفُوا بِالْعَهْدِ إِنَّ الْعَهْدَ كَانَ مَسْؤُولاً)**

**(Oofiya ballanka illeen ballanka waa lays warsane)**

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, oo ku yiri xadiiskiisa sharafta leh:

**(إِنَّ خِيَارَ عِبَادِ اللَّهِ عِنْدَ اللَّهِ الْمُوفُونَ الْمُطَيَّبُونَ)**

(**Addoomaha Ilaahay waxaa ugu fiican agtiisa kuwa oofiya (ballanka) oo wanaagsan**)

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Intaas kaddib:**

Islaamka waa diinta amaanka iyo badbaadada iyo nabadgalyada iyo deganaanta, iyo wanaagga iyo

samafalka, waxaan shaki ku jirin ballanka inuu ka mid yahay akhlaaqda sare, isagaa lagu adkeeyaa kalsoonida, amaakana lagu gaaraa shucuubta dhexdooda, waxaana laga helaa xiriirka iskaashiga iyo kalgacalka iyo dhismaha iyo horumarka oo ka dhexeeya dad hal bulsho lagu tiriyo, sidaa awgeed in ballanka la oofiyo waxay ka mid tahay iimaanka, iyo daliilka ka mid ah daliilyaasha runta iyo ixsaanka, waa abaabin rabbaani ah oo weyn, iyo khuluq nabawi wanaagsan, iyo dhaqan islaami toosan.

Islaamka wuxuu amray dadka raacsan inay ku dhaqmaan dhaqanka oofinta ballanka iyo heshiisyada, aadna ayuu u adkeeyay arrinkaas, wuxuu yiri Alle:

**(وَأَوْفُوا بِالْعَهْدِ إِنَّ الْعَهْدَ كَانَ مَسْؤُولاً)**

**(Oofiya ballanka illeen ballanka waa lays warsane)**

Wuxuu yiri Alle:

**(وَأَوْفُواْ بِعَهْدِ اللّهِ إِذَا عَاهَدتُّمْ وَلاَ تَنقُضُواْ الأَيْمَانَ بَعْدَ تَوْكِيدِهَا وَقَدْ جَعَلْتُمُ اللّهَ عَلَيْكُمْ كَفِيلاً إِنَّ اللّهَ يَعْلَمُ مَا تَفْعَلُونَ)**

(**Oofiya Ballanka Alle markaad ballan gashaan hana burinina dhaarta kadib intaad adkayseen ood uga yeesheen Ilaahay korkiina kafiil (ilaaliye), Ilaahayna waa ogyahay waxaad falaysaan**), taasoo laga wado oofiya ballan kaste aad gasheen, idinka iyo Ilaahay – *cazza wajalla* - ha idin ka dhexeeyo ama idinka iyo dadka, hana burinana dhaarta markaad adkeyseen

kaddib, idinkoo ka dhigtay Ilaahay ilaaliye markaad ballamayseen, qofkii heshiis galo waxaa laga rabaa inuu tixgaliyo, qofkii ballanqaad sameeyo waxaa laga rabaa inuu kasoo baxo.

Siduu sheegay Allaha xaqa ah - *subxaanu watacaalaa* - dadka ballanka oofiya inay yihiin kuwa Alle jecel yahay, waana dadka runta iyo taqwada u saaxiibka ah, Alle wuxuu leeyahay:

(بَلَى مَنْ أَوْفَى بِعَهْدِهِ وَاتَّقَى فَإِنَّ اللّهَ يُحِبُّ الْمُتَّقِينَ)

(**Saas ma aha ee ruuxii oofiya ballankiisa oo dhawrsada Alle waa Jecel yahay dhawrsadayaasha**), wuxuu leeyahay Alle:

(وَالْمُوفُونَ بِعَهْدِهِمْ إِذَا عَاهَدُواْ وَالصَّابِرِينَ فِي الْبَأْسَاء والضَّرَّاء وَحِينَ الْبَأْسِ أُولَئِكَ الَّذِينَ صَدَقُوا وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُتَّقُونَ)

(**Oofiyana ballankooda, markay ballamaan, ku samra dhibka iyo rafaadka iyo waqtiga dagaalka, kuwaasina waa kuwa ka runsheegay Iimaankooda waana kuwa dhawrsada**), wuxuu caddeeyay Alle - *subxaanahu* - inay yihiin kuwa helayo ajar weyn, jannada naciimkana dhaxlaya, wuxuuna yiri:

(وَمَنْ أَوْفَى بِمَا عَاهَدَ عَلَيْهُ اللَّهَ فَسَيُؤْتِيهِ أَجْرًا عَظِيمًا)

(**Ruuxii oofiyana wuxuu Alle kula ballamay wuxuu siin ajari wayn**)

Kaddib wuxuu ku caddeeyay Alle ajarkan weyn meel kale ka mid ah kitaabkiisa, wuxuu yiri:

(وَالَّذِينَ هُمْ لِأَمَانَاتِهِمْ وَعَهْدِهِمْ رَاعُونَ * وَالَّذِينَ هُمْ بِشَهَادَاتِهِمْ قَائِمُونَ * وَالَّذِينَ هُمْ عَلَى صَلَاتِهِمْ يُحَافِظُونَ * أُولَئِكَ فِي جَنَّاتٍ مُكْرَمُونَ)

(**Kuwa waxa lagu aaminay iyo ballankoodaba ilaaliya * kuwa maraggooda si fiican u furay * kuwa salaaddooda ilaaliya * kuwaasi waxay geli Jannooyin lagu sharfo**)

Nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu kor u qaaday qiimaha oofinta ballanka, wuxuuna ka digay in la buriyo, ama in aan la oofinin, khiyaanada iyo oofin la'aanta ballanka waxaa ku sugan fasahaadka bulshada, iyo kalsooni darrada dadka dhexdooda, iyo luminta amaanada, wuxuu yiri nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

( آية المنافقِ ثلاثٌ : إذا حدَّث كذَب ، وإذا وعدَ أخلفَ ، وإذا اؤتمِنَ خانَ)

(**Calaamadda munaafuqa waa seddex: hadduu sheekeynayo been buu sheegaa, hadduu ballanqaad sameeyana wuu ka baxaa, haddii amaano loo**

**dhiibtana wuu khiyaanaa**), wuxuu leeyahay nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

**(المُسْلِمُونَ عَلَى شُرُوطِهِمْ ، إِلاَّ شَرْطًا حَرَّمَ حَلاَلاً ، أَوْ أَحَلَّ حَرَامًا)**

(**Muslimiinta waxaa ka dhexeeya shuruudahooda, shardi xarrimay xalaal mooye ama mid xalaaleeyay xaaraan**), wuxuu ka digay nabiga cuquubada khiyaanada, wuxuu yiri:

**(إِذَا جَمَعَ اللهُ الْأَوَّلِينَ وَالْآخِرِينَ يَوْمَ الْقِيَامَةِ ، يُرْفَعُ لِكُلِّ غَادِرٍ لِوَاءٌ ، فَيقال: هَذِهِ غَدْرَةُ فُلَانِ بْنِ فُلَانٍ)**

(**Markuu Ilaahay kulmiyo dadkii hore iyo dadkii dambe maalinta qiyaame, qof kastoo khiyaanoole ah waxaa loo taagaa calan, waxaa la dhahaa: middan waa khiyaanada hebel ina hebel**), Ibnu khatiir - *ilahaay ha u naxariistee*- wuxuu leeyahay: xigmada ku jirto arrinkan waxay tahay, khiyaanada maadaama ay qarsoon tahay, oo aysan dadka arkeynin, marka la gaaro maalinta qiyaame waxay noqonysaa calan qofka ku caddeynaya waxa uu sameeyay, sidaas oo kale waxaa usoo muuqanaya dadka waxa ay qarsanayeen ee ah dhagar iyo khiyaano, Ilaahyna - *cazza wajalla* - wuxuu ku hoojinayaa dadka hortooda.

Ballamada sharciga xaniifka faray in la oofiyo oo aanna la burinin waxaa ka mid ah heshiiska amaanka, waxaa laga wadaa casrigan xaadirka ah: waxa ay bixinayso dowladda oo ah oggolaansho ama fiiso oo ay siinayso dadka u dhashay dowladaha kale ha ahaado dalxiise

ama booqade ama oo qof degan, taasoo ku salaysan dhaqanka caalamka iyo heshiisyada caalamiga ee lagula dhaqmo dublamaasiyiinta, iyo kuwa la midka ah, ama ku salaysan heshiis ka dhexeeya labada dowladood, si kaste ha ahaatee oo sugan lana oggal yahay qaanuun ahaan, oona lagu dhaqmo xagga dowladda martida loo yahay, si waafuqsan qaanuunkeeda, qofkan islamarka uu helo oggolaanshaha deganaanta ama fiisaha wuxuu ku leeyahay xaq iyo xurmad dowladdan dhexdeeda, ballankan ay siisay dowladda wuxuu noqonayaa mid shacabkeeda oo dhan laga rabo inay fuliyaan iyo dadka degan, lamana burin karo, mana laga siiban karo sharci ahaan, qofka shacabka ka mid ah oo arko arrin taabanayso amaanka dalkiisa ama nidaamka guud ee dowladdiisa khilaafsan waa inuu gaarsiiyaa dadka shaqo ku leh arrintaas, si dowladda ula xisaabtanto si waafaqsan sharciga, maxaayeelay qof shacabka ka tirsan lama xisaabtami karo, ama dhib uma geysan karo, haddii kale arrimaha waxay isu baddalayaan fowdo iyo xasillooni la'aan.

Waxaan shaki ku jirin, in ballanka la oofiyo inay ka mid tahay waajibaadka la adkeeyay xagga sharciga iyo qaanuunka iyo wadanimada iyo banii'aadannimada, haddii diinteena xaniifka ah ay kor u qaadday heshiiska amaanka, muslimiinta ballantooda waa hal, waxaa laga wadaa ballanka qofka muslinka uu dusha iska saarayo

muslimiinta oo dhan ayuu laasimayaa, maxaa u malaynaysaa haddii ballankan uu noqdo mid sharciga iyo qaanuunka waafaqsan oo midba midka kale uu xoojinayo oona taageerayo? Waxaan shaki ku jirin inay keenayso arrintaas in la oofiyo ballamada oo aanna la burinin, oo aanna la dayacin xitaa in aan la taabanin.
Islaamka waa diin ilaalisay ballamada iyo heshiisyada, waa diin aan garanaynin qish iyo dagid iyo khiyaano, kama sugnaanin rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – isaga iyo qof ka mid ah asxaabtiisa - *Ilaahay raalli haka noqdee* - inay qof u diideen amaan ama ay buriyeen heshiis amaan oo ay qof siiyeen, wuxuu leeyahay Ilaahay asoo la hadlayo nabigiisa - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - :

**(وَإِمَّا تَخَافَنَّ مِن قَوْمٍ خِيَانَةً فَانبِذْ إِلَيْهِمْ عَلَى سَوَاء إِنَّ اللّهَ لاَ يُحِبُّ الخَائِنِينَ)**

(**Haddaad ka cabsato qoom khayaanadii u tuur (ogaysii) ballankii si siman, Illeen Alle ma jecla khaa'imiinta**)
Maalintii heshiiska ka dhexeeyay sayidkeena Mucaawiya bin Abii Sufyaan - *Ilaahay raalli haka noqdee* - iyo Ruum oo Mucaawiya doonay inuu aado meel u dhow

soohdinta Ruum marka uu heshiiska dhammaado uu kediyo nin ayaa soo haleelay oo asxaabta nabiga ka mid ah isagoo dhahayo: Allaahu Akbar Allaahu Akbar, Ballanka hala oofiyo khiyaano maya, way eegeen wuxuuba ahaa Camr bin Cabsa - *Ilaahay raalli haka noqdee* - Mucaawiya ayaa qof u usoo diray wuu weyddiiyay wuxuu yiri: waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - dhahaya:

**(من كان بينه وبين قوم عهد فلا يشدّ عقدة، ولا يحلّها حتّى ينقضي أمدها، أو ينبذ إليهم على سواء)**

(**Qofka isaga iyo dad heshiis ka dhexeeyo yuuna burinin, yuuna ka bixin ilaa waqtiga ka dhammaanayo ama inuu u tuuro si laysla og yahay**), Waa laabtay Mucaawiya.

Weynida islaamka waxay kasoo dhex muuqanaysaa amarka Alle - *cazza wajalla* - uu amray nabigiisa - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - inuu magangalyo siiyo qofka ka dalbado xataa hadduu yahay gaal, xitaa hadduu yahay mid dagaal kula jiro wuxuu leeyahay Alle -:

**(وَإِنْ أَحَدٌ مِنَ الْمُشْرِكِينَ اسْتَجَارَكَ فَأَجِرْهُ حَتَّى يَسْمَعَ كَلَامَ اللهِ ثُمَّ أَبْلِغْهُ مَأْمَنَهُ ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ قَوْمٌ لَا يَعْلَمُونَ)**

(**Mid ka mida gaaladana hadduu magangal ku waydiisto magangali intuu ka maqlo hadalka Alle markaas gaarsii meel amaan ah, illeen waa qoom aan wax ogayne**)

Nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu ku sugay hadalkiisa iyo falkiisa qiyamtan sharafta leh oo u keenaysa amaan iyo xasillooni dadka oo dhan, wuxuu leeyahay:

**(لَا إِيمَانَ لِمَنْ لَا أَمَانَةَ لَهُ، وَلَا دِينَ لِمَنْ لَا عَهْدَ لَهُ)**

(**Iimaan ma laha qofkaan amaano lahayn, diinna ma laha qofkaan ballan lahayn**)

Wuxuu leeyahay:

(مَنْ قَتَلَ مُعَاهَدًا لَمْ يَرِحْ رَائِحَةَ الجَنَّةِ ، وَإِنَّ رِيحَهَا تُوجَدُ مِنْ مَسِيرَةِ أَرْبَعِينَ عَامًا)

(**Qofka dilo mucaahad jannada carafteeda ma urinayo, iyadoo carafteeda laga helo meel afartan loo socdo**)

Wuxuu leeyahay rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

**(الْمُسْلِمُ مَنْ سَلِمَ النَّاسُ مِنْ لِسَانِهِ وَيَدِهِ ، وَالْمُؤْمِنُ مَنْ أَمِنَهُ النَّاسُ عَلَى دِمَائِهِمْ وَأَمْوَالِهِمْ)**

**(Muslinka waa midka ay ka nabadgaleen dadka carrabkiisa iyo gacantiisa, mu'minkana waa midka dadka u nabadgaliyay dhiiggooda iyo hantidooda)**.

Waa kanaa nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - si camali ah noogu soo bandhigayo tusaalooyinka ugu fiican ee oofinta ballanka, xitaa cadowgiisa hadday yihiin, wuxuu ka warramayaa Xutheyfa bin Alyamaan - *Ilaahay raalli haka noqdee* - maalinta Badar wuxuu leeyahay: Badar inaan ka qaybgalo igama reebin arrinkan mooyee kaasoo ah aniga iyo aabbahayga ayaa soo baxnay waxaa na qabsaday gaalada Qureysh waxay dhaheen: idinka Muxamed ayaad u socotaan waxaan niri: uma socono, uma jeedno waxaan Madiina ahayn, waxay nala galeen ballanka Ilaahay inaan madiino aadeyno oo aanan la dagaallameynin, waxaan u nimid rasuulkii Ilaahay - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - waxaan u sheegnay warka wuxuu yiri: (**iska baxa ballankooda ayaan u oofinaynaa Ilaahayna waan u kaalmaysanaynaa**).

Waxaan adkeynaynaa in laynaga rabo dhamaanteena inaan ilaalino ballanka iyo heshiisyada ay dowladda la gashay qof kaste oo dalkeena soo galaya, inaan isugu kaalmaysano in la ilaaliyo dhiiggiisa iyo sharftiisa iyo maalkiisa, iyo wixii u gaarka ah, waxaa lanaga rabaa inaan si wanaagsan u qaabilno, aan qiimayno, si uu nooga arko waxa aan jecel nahay inuu naga haysto oo ah weynida diinteena iyo xeeldheerida dhaqankeena, sarreynta insaaniyadeena, taasoo kaalin ka qaadanayso

sameynta sawir maskaxeedka oo aan rabno in laga haysto diinteena iyo dalkeena iyo bulshadeena, waana sidan xaalka ummadaha hormarsan.

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxamed uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Walaalaha islaamka ahow:**

Islaamka waa diinta cadaaladda iyo iscafiska iyo nabad iskula noolaanshaha, qofka muslinka mar kaste waa mid leh amaan iyo nabadgalyo meel kaste uu joogo dalkiisa iyo dalalka kaleba, muslinka hadduu dal kale aado ha ka mid ahaado dalalka muslimiinta ama yuuna ka mid ahaanin, fiisaha uu dalkaas siinayo wuxuu ka dhigan

yahay ballan nabadgelyo oo uu kaga nabadgalayo naftiisa, sidoo kale waa ballan oo isaga laga rabo inuu nabadgaliyo dadka dalkaas ku nool oo ay kaga nabadgalayaan maalkooda iyo naftooda, taas waxay ku kallifaysaa inuu u hoggansamo dalkaas nidaamka u degsan, wixii laga rabana inuu u guto si run iyo amaano ku salaysan, waxaana mamnuuc ka ah inuu hantidooda si xaq darro ku qaato, ama inuu ku xadgudbo sharftooda ama inuu khiyaano qaab kaste ha ahaatee ilaa uu ugu noqdo ergey fiican diintiisa iyo dalkiisa iyo dhaqankiisa, marka uu galayba dalkaas waaba isagoo Ilaahay ballan la galay oo kale si uusan u khilaafin oraahda Alle:

(**وَالَّذِينَ يَنْقُضُونَ عَهْدَ اللَّهِ مِنْ بَعْدِ مِيثَاقِهِ وَيَقْطَعُونَ مَا أَمَرَ اللَّهُ بِهِ أَنْ يُوصَلَ وَيُفْسِدُونَ فِي الْأَرْضِ أُولَئِكَ لَهُمُ اللَّعْنَةُ وَلَهُمْ سُوءُ الدَّارِ**)

(**Kuwa buriya ballanka Alle adkayntiisa kadibna gooya wuxuu faray Alle in la xidhiidhiyo oona fasaadiya dhulka kuwaas waxaa u sugnaaday lacnad iyo guri xun**)

Imaam Shaafici - *Ilaahay ha u naxariistee* - wuxuu ku leeyahay kitaabkiisa (Al'um): "qofka hadduu ku galo dhulka gaalada amaan ay iyaga siiyeen uma bannaana inuu hantidooda wax ka qaato - ha yaraado ama ha badnaado - xitaa haddii ay kula jiraan muslimiinta dagaal, maxaayeelay amaan ayay siiyeen isagana waa inuu amaan siiyaa sidaas oo kale, maxaayeelay ugama

bannaana markuu amaankooda ku jiro wixii hantida muslimiinta uga bannaan mooyee'.

**Maxaa ka fiican qofka yiri:**

**وَفاءُ العَهدِ من شِيَـمِ الكـرامِ * ونقـضُ العَهـدِ مـن شِيَـمِ اللِّئَـامِ**

**وعندي لا يُعَـدُ مـن السّجايـا * سِـوَى حِفـظِ المَـوَدّةِ والذِّمـامِ**

**Oofinta ballanka waxay ka mid tahay dabciga dadka wanaagsan * burinta ballankana waxay ka mid tahay dabciga dadka xun**

**Aniga kuma tiriyo dabeecadaha waxaan ahayn ilaalinta kalgacalka iyo ballamada.**

**Ilaahayow nangu hanuuni akhlaaqda midda ugu fiican, waxaan adiga ahaynna kuma hanuuniyo, nagana leexi midda xun waxaan adiga ahaynna nagama leexiyo middeeda xun.**